Socialstyrelsen

Somaliska

# Sharciyada iyo qawaaniinta guurka – carruurta ee Iswiidhan

**Qof walba oo ka yar 18 sano waa ilmo sida uu qabo sharciga Iswiidhishka. Waa mamnuuc in la guursado carruur. Guur carruureedka dibedda sharci ahaan lagama qirsana Iswiidhan.**

Carruurtu waxey xaq u leeyihiin in ay dhigtaan dugsi waxna bartaan,fursad u helaan hiwaayad oo ay u hormaraan qof ahaan. In reer la dhisto waa mas'uuliyad oo ay carruurta qaadi karin. Guurka horey loo guursado waxa uu keeni karaa caafimaad daro jireed iyo mid maskaxeed.

## Middani waxey khuseysaa Iswiidhan

Carruurta oo dhan, labadaba gabadho iyo wiilalba, waxey leeyihiin isku xaquuq. Iswiidhan waxaa ka jira oo kale:

- carruurta ka yar 15 sano waxey xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo ficilada galmada.
- dhamaan waxey helayaan fursad warbixin ku saabsan galmada, uurka iyo carruurta dhalida.
- inaad sameyso ilmo soo tuurid haddaad rabto inaad joojiso uur.
- Galmada lala sameeyo qof asaga oo aan ranbin waa kufsi, xitaa guurka dhexdiisa.
- dadka guursaday oo dhan waxey xaq u leeyihiin iney kala tagaan ama isfuraan, xitaa haddii dhinac uusan rabin.

Mar haddii qof uu buuxiyo 18 sano waxa uu qofka xaq u leeyahay in uu go'aamadiisa gaaro.

## Guur carruureedka waddanka dibaddiisa lagu soo dhisay kama sharciyeysna Iswiidhan

Laga billaabo 1 bisha janawari 2019 guur kama jiri karo Iswiidhan haddii mid ka mid ah labada lamaane ey da'diisu ka yartahay 18 sano marka ey is guursadeen. Mararka qaar waa la aqoonsan karaa guur carruureed waddanka dibaddiisa lagu soo dhisay. Kow waa in labada lamaane ey da'doodu ka weyntahay 18 sano marka ey dalbanayaan in guurkooda looga diiwaan geliyo Iswiidhan. La-maanaha waa in ey is guursadeen ka hor 1 bisha janawari ee 2019 ama waa in ey jiraan sababo kale oo la aqbali karo si loo aqoonsado guurka. Sababo la aqbali karo waxaa tusaale ahaan ka mid ah in ey jiraan cawaaqibo halis u kee-naya lamaanaha haddii eysan isasii qabin. Kiis kasta si gaar ah ayaa loogu kuur gelayaa.

## Waalidka ama qof mas'uul ka ah ayaa mas'uul ka ah ilmaha.

Ugu horeyn waa waalidka, ka mas'uul ahaan, ayaa ka mas'uul ah si ay ilmaha ugu koraan meel deggen oo baahidooda lagu buuxinayo. Haddii loo baahdo waxa ay adeega bulshada ee degmada bixin karaan taageero.

Dhamaan inta ka yar 18 sano ee dalbanaya magangalyo waalid la'aan ama qof kaloo mas'uul ka ah waxaa lagu xisaabinayaa ilmo keligood wadanka yimid. Waxa loogu yeero ayaa loo qabanayaa tusaale ahaan si uu ilmuhu ula xiriiro dowlada iyo inuu ka warhayo dhaqaalihiisa. Qof loo arko in uu guur kala dhaxeeyo ilmaha ma yeelan karo xaqa go'aaminta ee ilmaha ee uu leeyahay waalidka ama qofka mas'uul looga dhigo.

## Galmo lala sameeyo qof ka yar 15 sano waa danbi

Carruurta ka yar 15 sano waxey xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo ficilada galmada. Waa danbi in lala galmoodo qof ka yar 15 sano. Arrintan waxey khuseysaa xitaa haddii aad guur ku dhex nooshahay. Qofka la sameeyo galmo ama la sameeya falal galmo kale carruur ka yar 15 sano waxa uu sameeynayaa kufsi carruureed. Danbigu waxa uu keeni karaa xabsi ugu yaraan laba sano ugu badnaana toban sano.

## La xiriirka hey'adaha dowlada Iswiidhan

Hey'adda socdaalka waxey maamushaa dhamaan codsiyada magan galyo doonka. Adeega bulshada waxey ka mas'uul tahay iney baaraan baahida carruurta ayna siiyaan kaalmo iyo xifdin. Hey'adaha waxey la shaqeynayaan carruurta iyo qofka ka mas'uulka ah carruurta. Waxey sameynayaan in carruurta loo ogolaado in ay sheegaan sida ay wax u arkaan, tusaale ahaan meesha uu ilmuhu degeyo iyo sida uu ilmuhu rabo.

Dhamaan kuwa ka shaqeeya howlaha ku saabsan carruurta iyo dhalinyarada, sida dugsiga iyo daryeelka caafimaadka, sida uu qabo sharciga waxa ay si degdeg ah u gudbinayaan walwalkooda adeega bulshada haddii ay dareemaan in ilmo dhibaateysan yahay.

## Haddii aad ku cusub tahay Iswiidhan

Gacan-yarahaaga hey'adda socdaalka ama adeega bulshada waxey ku siin karaan warbixin ku saabsan waxa khuseeya Iswiidhan.

Bogga www.informationsverige.se waxaa ku jira warbixin ku saabsan bulshada Iswiidhan oo luqado kala duwan ku qoran.

**Information till barn:**

**www.kollpasoc.se/barnaktenskap**